



DIB U CUSBOONAYSIINTA QORSHAHA DHAMAYSKA TIRAN- MAXAAD U MALAYNAYSAA?

WAA MAXAY QORSHAHA DHAMAYSKA TIRANI? Qorshaha dhamayska tiran ee Tukwila waa warqadda hagista ama sawir farsameed nashqado lag u sawiro xaashi xasaasi ku ah ilayska oo ku saabsan siday u maarayndoontaa koboca iyo horumarka mustaqbal 20 sano ee soo socda. Qorsha waxa la qaatay 1995, waxaana dib loo cusboonaysiyay 2004 tii, iyadoo ay jiraan fursado in horumar lagu samayn karo sanad kasta. Qorshaha Dhamayska tirani waxa uu bixinayaa qaab dhismeed debecsan si loola qabsado xaaladaha dhabta ah geedi socodka wakhtiga. "Gudaha nuxur" ahaan waxa uu ka kooban yahay qaab dhismeedka Qorshaha Dhamayska tirani waa walxaha isticmaalka dhuleed, isgaadhsiinta gaadiidka, guriyaynta, horumarka dhaqaale, qorshaynta mashaariicda caasimada, adeegyada iyo deegaanka.

GURI FURAN gudaha bisha MAARSO 27, 2013-- LA WADAAG FIKRADAHAAGA
DIB US CUSBOONAYSIINTA QORSHAHA
DHAMAYSKA TIRAN!

Arbacada, 27 Maarso, 2012

4:30 ilaa 6:30 fiidnimo. (Kaalay wakhti
kasta saacadahan gudohood)

Goobta bulshada ee Tukwila

12424 42naad Wadada Koonfureed,
Tukwila

Waxaad helidoontaa fursadaha si
aad u waydiiso su'aalo ku saabsan
Qorshaha Dhamayska tiran waxaaanad
barantoodaa waxa badan oo ku saabsan
is bedela la soo jeediyay.

Inta lagu guda jiro 2013 iyo 2014, Tukwila waxay dib u eegi doontaa oo dib cusboonaysiin doontaa Qorshaha Dhamayska tiran iyo shuruucda horumarinta sida ay uga baahato Xeerka Koboca Maaraynta ee Gobolka Washington. Ee 30ka Juun, 2015 tahay wakhtiga loo qabtay ee kama dambaysta ah, Tukwila waxay qaadan doontaa dib u eegid kasta oo loo baahdo sidaas darteedna Qorshaha Dhamayska tirani 1) uu daboolo shuruucda gobolkoo dhan ama qorshaynta goboleed, iyo saadaasha koboca, 2) waxanu sawir buuxa ka muujinayaa waxayaabaha ahmiyada bulshada ah ee lagu cadeeyay qorshaha istaraatiijiyadeed ee Tukwila ee dhawaan la qaatay, iyo 3) way fudadahay in Interneka lagu isticmaalo. Intii lagu jiray 2013 kii, Adeegyada, iyo Qorshaynta Mashaariicda caasimada, isgaadhsiinta Gaadiidka, Deegaanka Dabiiciga ah, Southcenter/Goobta Tukwila ee magaalada iyo Bulshada muuqaalka Cutubiyada ayaa laga hadli doonaa, siiba faahfaahin dib loo cusboonaysiiyay oo ku saabsan cutubka Shoreline. Inta lagu jiro 2014 waxaanu ku talaabsan doontaa Horumarinta Dhaqaalaha, Guriyaynta, Xaafadaha la degenyahay, Koonfurta Tukwila, iyo Marinadda is Gaadhsiinta gaadiidka.

LIISKA DIRISTA FARIIMAHA EMAYLKA iyo BOGGA INTERNETKA—Kaadhkani waxa uu noqondoona ka aanu kaala soo xidhiidhno ee waraaqaha boostada! Xidhiidhka mustaqbalku waxa uu noqon doonaa fariimo emayl oo keliya. Fadlan ku soo biir liiska aan waraaqaha u dirno oo eeg bogga interneka si aad xog uga hesho ku saabsan dib u cusboonaysiinta Qorshaha Dhamayska tiran xaga TukwilaWA.gov/CompPlan.html. Su'aalaha? Kala la xidhiidh Rebecca.Fox@TukwilaWA.gov ama 206-431-3670.